OIKEUSMINISTERIÖ
JUSTITIEMINISTERIET

Wasaaradda cadaaladda

WARBIXIN KU SAABSAN XUQUUQDA UU LEE YAHAY QOFKA DENBIGA LAGA GALO EE DULMANAHA AH

Qormadan yar waxaa lagu soo ururiyey arimaha uu qofka denbiga laga galaa xaq ugu lee yahay inuu warbixinahooda ka helo hawl-wadeenada dawladda. Warbixinuhu waa kuwo ku xiran oo isla badbadalaya hadba waxa markaas qofka la dulmay u baahan yahay inuu ogaado, iyo xaaladdiisa shakhsiyadeed iyo denbigaasi nooca uu hadba yahay. Waxaa kaloo qormadan ka helaysaa meelaha aad la xiriiri karto iyo linkiyo internetka ah, kuwaas oo ku qoran dhamaadka qormada.

1. Sida dacwadda denbiga loo sameeyo

Waxaa aad muhiim u ah in qofka dulmanaha ee denbiga laga galay uu dacwad u gudbiyo booliska. Dacwadda waa in uu u sameeyo sida ugu dhakhsaha badan, si markaas denbiga baaritaankiisu u fududaado. Sidoo kale in qofka waxyeelo loo geeystay uu mag-dhawgeeda helaa waxay ku xiran tahay in denbiga dacwad laga sameeyey. Dacwadda waxaa loo gudbin karaa booliska adigoo jooga goobta denbigu ka dhacay, ama inaad saldhigga booliska aadid, sidoo kale denbiyada yaryar waxaa dacwaddooda laga samayn karaa internetka ama taleefan ayaa ku gudbin kartaa. Dulmanuhu wuxuu xaq u lee yahay inuu helo caddayn xoojin ah oo ku saabsan dacwadda uu sameeyey oo qoraal ah.

2. Taageero ku wajahan dulmanaha denbiga laga galay

Qofka denbiga laga galay ee la dulmay wuxuu u baahan karaa caawimaad dhakhtar ama adeegyada kale ee sooshalka- iyo daryeelka caafimaadka, sida gargaarka degdega ah ee sooshalka, daryeel caafimaad iyo baxnaanin jir ahaan iyo maskax ahaanba leh. Dulmanuhu wuxuu isticmaali karaa adeegyadaas isla si la mid ah sida dadka kale u isticmaalaan.

Hay'addo badan ayaa dadka denbiyada laga galo ee la dulmo ugu deeqa taageero, talo-bixino iyo jihaymo. Xarunta gargaarka degdega ah ee dadka denbiyada laga galo ee la dulmo ayaa waxay bixisaa caawimaado ku aadan dhamaan noocyada denbiyada iyo maraaxisha denbiyadu ay maraan, waxay sidoo kale bixisaa qofka la dulmay siduu xaqiisa u raadsan lahaa talooyin wax ku ool ah oo ku saabsan. Qofka isagu dadka ehelka sokeeye u ah denbiga ka galaan oo dagaal kula kacaan wuxuu magangalyo iyo amni ka heli karaa guryaha badbaadinta qoyska, waxaa sidoo kale caawimaadahaas loo heli kara qaab taalefan ahaan ah iyo qaab caawimaadu tahay mid furan oo aadeeg furan ah. Magaalooyinka qaarkood waxaa ka jira caawimaado khaas ah oo loogu talogalay dadka loo geeysto dulmiga sakshuwaalka ama galmada ku saabsan iyo haweenka ajaanibta ah caawimaado khaas ah oo u gaar ah. Dadka iyagu dulmanayaasha u noqda ka ganacsiga dadka waxay lee yihiin nidaam u gaar ah oo lagu caawiyo, nidaamkaas oo ay ugu gudbi karaan markay buuxiyaan shuruudaha u yaal ee laga rabo. Haddii qofka dulmanaha ah uu bixiyo ogolaansho, booliska ama qofka hawl-wadeenka ah ee denbiga baaraya ayaa wuxuu u gudbinayaa warbixinta iyo meesha dulmanaha laga helo xarumaha caawimaadaha bixiya, kuwaas oo qofka dulmanaha ah la soo xiriiraya.

Qofka dulmanaha ah wuxuu isticmaali karaa qofka taageere u ah oo la socda marka uu ku dhex jiro maraaxisha kiiska denbiga ah marayo. Qofka dulmanaha ah wuxuu codsan karaa qofkii uu isagu doono inuu u noqdo taageere la socda. Tusaale ahaan Rikosuhripäivistys oo ah xarunta gargaarka degdega ah ee

dulmanayaasha denbiga laga galo caawisa ayaad ka heli kartaa qof taageere ah oo lacag la'aan kuu ah, qofkaas oo ah qof hawshiisa loo tababaray. Qofka taageeraha ah wuxuu joogi karaa oo kula fadhin karaa waraysiyada iyo fadhiyada maxkamadaha, inkasta oo inuu kula joogo oo kula fadhiyo maraaxisha iyo goobaha qaarkood loo diidi karo oo la xadidi karo.

3. Caawimaad dhinacca sharciga ah

Qofka dulmanaha ah wuxuu xaq u lee yahay inuu isticmaalo qareen dhinacca sharciga ka caawiya oo la qora dacwadda denbiga laga galay, lana jooga waraysiyada iyo fadhiyada maxkamadda. Qareenku wuxuu noqon karaa looyar, ama caawiye dhinaca sharciyada dadweynaha ka caawiya ama qof haysta ogolaansho inuu maxkamadaha qofka qareen u noqon kara.

Dadka dakhliga yar soo galo iyo kuwa dakhligoodu dhexdhexaadka yahay waxaa u suurtogal ah inay dawladdu siiso caawimaado dhinacca sharciga ah. Markaas oo qareenka mushaharkiisa ay qayb ahaan ama gebi ahaan dawladdu bixinayso. Caawimaada dhinacca sharciga ah waxaa ka dalban kartaa xafiiska dhinacca sharciyada dadweynaha ka caawiya ama waxaad ka xeraysan kartaa dalabka internetka dhexdiisa barta adeegyada elegtarooniga ah. Qofka dulmanaha ah wuxuu sidoo kale codsan karaa oo ka dalban karaa caawimaada dhinacca sharciga ah xafiis looyar ama qareemo lee yihiin.

Maxkamadda laftigeedu waxay qofka u qaban kartaa caawiye qareen ah oo dhinacca sharciga u dooda iyo qof taageere ah, haddii kiisku ku saabsan yahay denbiyada ay dadka ehelka isu ahi isku sameeyaan ee dilitaanka ah, ama deniyada sekshuwaalka ah ama kiisku yahay mid ku wajahan dulmanaha naftiisa oo ciriir ku jirta ama caafimaadkiisa ama xornimadiisa, yahayna denbi culus. Marka kiisku ka mid yahay kuwaas aan soo sheegnay dawladda ayaa dulmanaha ka bixinaysa caawimaadaha dhinacca sharciga ah iyadoon loo eegayn dakhliga soo gala dulmanaha intuu doonaba ha ahaadee.

4. Dhawritaanka ama ilaalinta dulmanaha

Marmarka qaarkood dulmanaha waxaa noloshiis haraynaya cabsi, aar goosasho ama maraaxisha baaritaanka kiisku maryo dhibaatooyin iyo rafaad la xiriira. Dulmanaha waxaa laga rabaa haddi cabsidaas oo kale soo food-sarto inuu u sheego hawl-wadeenada dawladda. Hawl-wadeenada dawladda ayaa eegaya in qofka dulmanaha ah ee denbiga lagu sameeyey marka baaritaanka oobiidu socdo u baahan yahay ilaalin iyo inuu u baahan yahay marka maxkamadda la qaadayo in la ilaaliyo iyo waxa ay noqonayaan hawlahaas ilaalinta ah ee uu u baahan yahay. Eegitaankaas waxaa lagala shaqeeyaa dulmanaha, waxaana la eegaa oo tixgelin la siiyaa dulmanuhu sida uu yahay iyo shakhsiyadiisa, xaaladda uu ku jiro iyo denbigu inta uu le'eg yahay.

Qofka dulmanaha ah kiisaska qaarkood fadhiyada maxkamaddaha waxaa la dhagaystaa isaga oo fadhiya meel wajigiisa la qariyey, ama fiidiyoow baa lagu waraystaa ama waxaa la waraystaa qofkii denbiga ka galay oo aan goob joog ahayn ama iyada oo aan maxkamadda dadweyne fadhiyin. Qofka dulmanaha ah waraysiga lala yeelanayo waxaa dhici karta in xaaladdaha qaarkood laga duubo fiidiyoow oo fiidiyoowgaas hadhow maxkamaddu markhaanti ahaan u isticmaasho, taasna waxay dhacdaa tusaale ahaan marka qofka dulmanaha ah ay da'diisu ka yar tahay 18-sano jir.

Si qofka dulmanaha ah shakhsiyadiisa iyo barayfadkiisa u gaarka ah loo ilaaliyo waxaa dhacda in marka ay jiraan shuruudaha qaarkood ay maxkamaddu go'aansato in aan dad shacab ah imaan fadhiga maxkamadda oo dhagaysan, sidoo kalana waxay maxkamaddu go'aamisaa in dokumentiyadda maxkamad qaadista la ilaaliyo, xukunka la gaaro qaybo ka mid ahna laga dhigo sir la xifdiyey. Dulmanuhu isaga ayaa arinta laga soo hadlay maxkamadda ka codsan kara. Fadhiga maxkamaddu wuxuu arimaha qaarkood go'aamin karaa sidoo

kale in warbixinta ku saabsan shakhsiga dulmanaha ah laga dhigo sir la xifdiyey. Arimaha noocaas ah waxaa ka mid ah tusaale ahaan denbiyada sekshuwaalka ama galmada la xiriira.

Fadhiga maxkamaddu wuxuu arimahan laga soo hadlay ee ah qaabka maxkamad qaadistoodu u dhacayso iyo hawlaha ilaalinta la xiriira u falanqeeyaa mar kasta si gooni-gooni ah iyaga oo tixraacaya ama eegaya mar walba kiiska, iskana dhawraya in qofka denbiga galay ee is difaacaya aan xaqiisa lagu tuman oo xad gudub lagu samayn. Fadhiga maxkamaddu go'aanka uu gaaro ee dambe wuu ka duwanaan karaa wixii markii hore lagu fakaray ee arinta loo haystay.

Xaaladdaha iyagu halista khatarta ah dulmanuhu wuxuu codsan karaa in warbixintiisa iyo halka laga helo laga dhigo sir oo la mamnuuco in la helo, wuxuu dalban karaa in aan loo soo dhawaan ama wuxuu codsan karaa in magaciisa iyo lambarkiisa aqoonsiga la badalo. Faahfaahin dheeraad ah oo arimahan ku saabsan waxaad ka helaysaa hawl-wadeenada dawladda iyo xafiisyada laga helo adeegyada taageerooyinka ah. Haddii qofka la siiyey warqadda ah in aan qof kale usoo dhawaan karin u guuro wadan kale oo EU-da ka mid ah, oo uu dareemo inuu wadankaas dhexdiisa u baahan yahay ilaalintii iyo dhawritaankii, wuxuu isla wadankaas ka dalban karaa maanacaadii ahayd inaan qof kale usoo dhawaan karin oo maxkamaddaas kale oo reer yurub ayaa siinaysaa warqadii dhawritaanka ahayd.

5. Magdhawyada

Dulmanuhu wuxuu xaq u lee yahay marka kiiska arimihiisa lagu gudo jiro inuu soo oogo in qofka denbiga ka galay uu uga mag-dhabo waxyeeladii uu u geeystay. Dulmanaha waxaa khasab ku ah oo laga rabaa inuu marka baaritaanka oobiidu uu socdo ama ugu damayn marka fadhiga maxkamadda la isugu yimaado sheegto waxyeelada soo gaartay oo uu sidoo kale ku soo oogo kan denbiga ku sameeyey wixii mag-dhawyo ah ee uu sheeganayo. Dulmanuhu wuxuu xaq u lee yahay inuu soo oogo tusaale ahaan mag-dhaw in laga siiyo sida wax laga jabiyey ama lagaa jeexay ama hanti ka dhuntay, daawo- iyo dhakhtar kharash kaga baxay, xanuunka iyo qaraaca iyo dhibaatada ama dhaawaca kale ee wakhti cayiman qofka haynaya iyo waayitaanka dakhliga soo galayay iyo sidoo kale xaaladaha qaarkood dhibaatada nafsad ahaaneed ee shaqsiga soo gaadhay.

Xeer ilaaliyaha ayaa haddii uu dulmanuhu ka codsado u soo oogaya mag-dhawyada uu codsanayo ee xagiisa ah, haddii arintu ay tahay mid fudud oo iska cad, oo xeer ilaaliyahana loo diray ama loo gudbiyey biilasha waraaqaha waxa la codsanayaa ku qoran yihiin, sida rasiidyadii ama wuxuun caddaynaya waxa la soo oogayo. Inta badan waxa qofku codsanayaa waa waxyeelo hantidiisa ama waxa uu lee yahay soo gaaray. Haddii fadhiga maxkamaddu uu ku xukumo qofka falka geeystay inuu mag-dhawyadaas bixiyo, waxaa markaas qofka lagala heshiinayaa sidii uu u bixin lahaa waxa la saaray ama xafiiska dadka lacagaha deymaha ka soo qaaday ayaa loo hawl gelinayaa inuu ka soo qaado wixii lagu xukumay.

Dhibbanaha dambiga loo geystey wuxuu xaq u yeelan karaa in mag-dhawyada loo xukumo ee rafaadka ama silica loo geeystay ku saabsan ay dawladdu siiso oo hantideeda ka bixiso mag-dhawga loo xukumay. Mag-dhawga waxaa laga dalbadaa Valtiokonttori oo ah khasnadda dawladda, lacagtaas oo badanaa ah mid ku saabsan waxyeelo qof loo geeystay ama rafaad qof soo gaaray. Si dulmanuhu uu u helo mag-dhawyadiisa waxaa khasab ku ah inuu marka hore dacwad uu booliska u gudbiyo oo denbiga laga galay ku saabsan sameeyo. Haddii arinta ama kiiska maxkamad la geeyo, waxaa laga doonayaa dulmanaha denbiga laga galay inuu sidoo kale maxkamadda dhexdeeda ku soo oogto kan falka ku sameeyey mag-dhaw. Mag-dhawyada waxaa sidoo kale xaaladdaha qaarkood bixiya oo laga qaataa shariikadaha caymiska ama xafiiska Kela-da.

Haddii qofka dulmanaha ah ee denbiga laga galay loogu yeero arinta kala caddaynteeda iyo baaritaankeeda oo maxkamadda laga waco, wuxuu xaq u lee yahay in hantida dawladda laga siiyo imaanshaha uu

maxkamadda yimid kharashkii safarka kaga soo baxay. Dulamanaha waxaa la siin karaa lacag maalmeed iyo kharashkii safarka kaga baxay iyo wixii dakhli soo geli lahaa maalintaas maxkamadda ku seegay ama ama ka baaqday.

6. Turjubaanidda iyo in waraaqaha dokumentiyada ah la soo turjumo

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu baaritaanka denbi baarista booliska dhexdiisa iyo fadhiga maxkamadda ku hadlo afka finnishka ama iswidhish. Dadka Saamiga ah marka ay nawaaxigooda ama gobolkooda joogaan waxay xaq u lee yihiin inay afkooda saamiga isticmaalaan. Hawl-wadeenada dawladdu waa in ay markii loo baahdo soo abaabulaan tujumidda. Dadka iyagu dulmanayaasha ah ee luuqaddaha kale ku hadla waxay isticmaali karaan dhamaan kiisaska denbiyada ah oo dhan wixii arimo ah oo ku saabsan luuqadda ay markaas si ku filan u garanayaan oo ugu hadli karaan. Haddi loo baahdo hawl-wadeenada dawladdu waa in ay dulmanaha usoo abaabulaan turjubaan luuqaddiisa garanaya. In turjubaan loo keeno waa in laga shaqeeyo marka baaritaanada hore ee booliska lagu gudo jiro iyo marka maxkamadda la qaadayo, sidoo kale marka dulmanaha ama qofka denbiga laga galay ku hadlo afka dhagoolayaasha, amase ay sideedaba qofka dulmanaha cilad xaga dhagaha ah oo haysta ama hadalka oo ku adag aawadiis ay meesha taal baahi ah in loo turjumo, waa in turjubaan loo qabto. Turjubaanka waxaa saaran waajibaad sir qarin ah. Turjubaanka khidmadiisa ama mushaharkiisa waxaa bixinaya dawladda.

Qofka dulmanaha ah ama denbiga loo geeystay wuxuu codsan karaa in dokumentiyada meelahooda muhiimka ah loo soo turjumo. Turjumida waxaa loo siin karaa qaab afka ah oo turjubaan waraaqaha u akhriyayo, waase haddii aan sharciga dhawrista xuquuquhu markaas qorayn in dokumentiyada qoraal ahaan loogu soo turjumo. Xaaladdaha qaarkood qofka dulmanaha ah waxaa dhacda in dokumentiyada qaar loo soo turjumo ama dokumentiyada inta la soo koobo loo soo turjumo.

Baaritaanka hore ee booliska dulmanuhu wuxuu heli karaa in loo soo turjumo dacwadda xoojinteeda qoraalka ku saabsan, go'aamada lagu joojinayo baaritaanka dacwadda iyo hadii loo baahdo wixii kale oo arimo ah oo la is oran karo waa qoraalo muhiim ah. Xeer ilaaliyaha ayaa wuxuu u diri karaa qofka dulmanaha ah go'aamo uu soo turjumay oo ku saabsan inuusan kiiska qofka denbiga galay kusoo eedaynayn.

Fadhiga maxkamadda marka la qaadayo qofka dulmanaha ah waxaa la siin karaa xukunka oo la soo turjumay, wakhtiga maxkamaddu dhacayso iyo goobta ogeysiimaha ku saabsan iyo sidoo kale haddii loo baahdo wixii arimo oo ah kale oo la is oran karo kiiska ayeey muhiim u yihiin.

7. Arimaha ku saabsan kiisaska denbiyada ah ka heshiintooda

Kiisaska denbiyada ah waxaa laga yeelan karaa heshiis gar-naqsi ah, haddii dulmanaha iyo kan denbiga looga shakiyey ay saas ogolaaadaan oo ku heshiiyaan. Waxaa intaasi dheer oo shardi ah in kan denbiga inuu sameeyey looga shakiyey uu ogolaado denbigu sida uu u dhacay iyo guud ahaan arimaha denbiga intooda ugu waa weyn, tan kale waxaa shardi u ah in heshiisku yahay mid waafaqsan danta iyo maslaxadda dulmanaha ama kan denbiga laga galay. Heshiisiinta gar-qaybsiga ahi waa lacag la'aan, waana arin aad u madax baanaan tahay oo khasab kuguma ah, haddii aad rabtana adigoo dhexda kaga jira ayaad ka noqon kartaa markaas doonto. Shaqaale u tababaran oo aan lacag ku qaadanayn oo iskood isu xilqaamay ayaa dadka labada daraf ee denbigu dhex maray hadalka kala siinaya si ay uga wada hadlaan wixii dhacay ugana heshiiyaan kharashka mag-dhawga ee denbigu keenay sidii la isugu gudi lahaa oo kan dulmanaha ah mag-dhawgiisa loo siin lahaa. Adeegan waxaa laga helaa dhamaan xafiisyada heshiisiinta ama gar-qaybta ee dalka oo dhan.

8. Kiiska falanqayntiisa warbixinaha ku saabsan

Qofka denbiga laga galay ee dulmanaha ah wuxuu xaq u lee yahay in haddii uu codsado uu helo kiiska falanqayntiisa warbixinaha ku saabsan, wakhtiga maxkamadda la qaadayo iyo goobta iyo sidoo kale xukunka ay maxkamaddu denbigaas ka bixiso. Waxaa intaasi dheer oo qofka dulmanaha ah ee denbiga laga galay uu xaq u lee yahay inuu helo wixii xog ah ee ku saabsan go'aamada laga gaaro baaritaanka kiiska sida in baaritaanka gebi ahaanba la joojiyo iyo sidoo kale haddii uu xeer ilaaliyuhu qaato go'aan ah inuusan kiiskan qofka denbiga galay ku soo eedayn.

9. Warbixin ku saabsan maxbuuska ama marka qofka baaritaan ahaan loo xiray la sii daynayo

Xaaladdaha qaarkooda uu denbigu halista yahay qofka dulmanaha ahi wuxuu xaq u yeelanayaa haddii uu codsado in la soo ogeysiiyo oo loo soo sheego haddii qofka denbiga ka galay ee maxbuuska ah ama baaritaan ahaanta loo xabisay la sii daynayo, ama uu xabsiga iskiis uga fakaday ama marka loo eego shuruudo kale in loo sheego wixii ku saabsan qofkaas xabsi ka bixiddiisa. Haddii uu dulmanuhu doonayo in la soo ogeysiiyo arimahan, waa in uu saas u sheegto baaritaanka hore ee booliska shaqaalaha wada ama xeer ilaaliyaha. Shaqaalaha ama booliska wada baaritaanka kiiska ayaa arintan kaa siinayaa faahfaahin sugan.

In xogahaas lagu siiyo waxaa u shardi ah in aan ogeysiinta aysan ka dhalanayn khatar soo gaarta qofka maxbuuska ah ama baaritaan ahaanta loo xirtay oo naftiisa iyo caafimaadkiisa aan waxyeelo soo gaarayn.

10. Wixii warbixino ah oo kale

Darajada dulmanuhu lee yahay baaritaanka hore ee booliska dhexdiisa

Hawl-wadeenada gacanta ku haya baaritaanka hore ee oobiida ee kiiska ayaa dulmanaha siinaya faahfaahin sugan oo ku saabsan waraysiga lala yeelanayo iyo xuquuqda qofka denbiga laga galaa lee yahay iyo waajibaadka saaran. Tusaale ahaan qofka dulmanaha ah ee denbiga laga galay waxaa waajib ku ah inuu denbiga iyo waxyeelada soo gaartay runta ka sheego.

Qaabka hawl-wadeenada kiiska hayaa u dhaqmaan oo laga dacwoodo

Qofka dulmanaha ah wuxuu ka dacwoon karaa hawl-wadeenada dawladda ee baaritaanka wadaa qaabka ay u dhaqmaan, hadii uu u arko dulmanuhu in qofka shaqaalaha dawladda ahi uu si khaldan hawshiisa u hayo ama uu shaqadiisi dayacay oo ka soo bixi waayey. Dacwadda waa in qoraal ahaan laga dhigo oo loo gudbiyo waaxdaas uu qofka hawl-wadeenka ahi ka shaqeeyo, meesha qaabka khaladan ee wax loo sameeyey ka dhacay ama waa in loo gudbiyo qofka shaqaalaha ah madaxda ka saraysa.

Xeerilaaliyuhu marka uu gaaro go'aan ah in uusan kiiska denbiga ah qofkii galay ku soo oogayn, qofka dulmanaha ahi wuu ka dacwoon karaa arintaas oo wuxuu u gudbin karaa fikraddiisa xeer-ilaaliyaha guud ee qaranka, kaas oo xaq u leh inuu kiiska mar kale eego bal in la soo oogi karo iyo in kale. Sidoo kale dulmanuhu wuxuu fikraddiisa u gudbin karaa xeer-ilaaliyaha guud ee qaranka marka uu wax ka qabo go'aamada kale ee xeer-ilaaliyihiisu gaaro ama qaabka uu u dhaqmay uu dulmanuhu u arko inay khalad tahay.

Wuxuu dulmanuhu fikraddiisa ka sheegan karaa qaab qof hawl-wadeen dawladeed ahi u dhaqmay oo wuxuu dacwaddiisa u gudbin karaa baarlamaanka gudigiisa qanuunka u qaabilsan ama xafiiska xeer-beegtida dawladda.

SIda laga yeelo marka dulmanaha laga galo denbi ka dhacay dal kale oo aan ahayn kan uu hadda ku nool yahay

Dulmanuhu wuxuu ka heli karaa taageero iyo talo-bixino xarumaha bixiya taageerooyinka iyo caawimaadaha dulmanayaasha, xataa haddii denbiga lagu sameeyey ka dhacay dal kaleeto.

Haddii dulmanaha uu ku dhacay denbi ka dhacay wadan ka mid ah midowga Yurub ee EU-da, waxaa dhici karta in hawl-wadeenka dacwadda gacanta ku hayaa uu xaaladdaha qaarkood u wareejiyo kiiska wadankaas kale ee EU-da ee dacwada kiiska loo gudbiyey ama laga bilaabay baaritaanka dacwadda. Dacwadda kiiska oo la wareejiyo waxaa tusaale ahaan u shardi ah in kiisku yahay mid halis ah oo daran ama qofka dulmanaha ah ee denbiga laga galay in aysan suurtogal ahayn inuu denbigan dacwad ka sameeyo marka uu kiisku dalkaas kale ka dhacay. Denbiyada qaarkooda halista ah wareejintooda waxaa xataa lagu fakaraa in loo gudbiyo dawlad kale oo ka baxsan EU-da.

Warbixino ku saabsan meelaha aad ka helayso arimahan faahfaahin ku saabsan haddii aad doonayso inaad hesho:

Meelaha aad la xiriiri karto iyo faahfaahino dheeraad ah:

Fiiro gaar ah u yeelo, in macluumaadkan guud ahaan lagu heli karo kaliya af finnish, af swidhish iyo af ingiriis.

Booliska: www.poliisi.fi, lambarka guud ee emerjensiga ama gargaarka degdega ah: 112
Adeegyada taageerooyinka iyo caawimaadaha:

- Xarunta gargaarka degdega ah ee dulmanayaasha: www.riku.fi, taleefanka 116 006
- Guryaha magan-galyada: www.nettiturvakoti.fi, www.thl.fi/turvakotipalvelut
- Xarunta dhexe ee dadka dhibka kufsigu soo gaaro lagu caawiyo ee loo yaqaan Raiskauskriisikeskus Tukinainen: www.nettitukinainen.fi, www.tukinainen.fi, taleefankooda 0800 97899
- Afar iyo labaatanka saac ama habeen iyo maalin xafiiska furan ee loogu talo galay dadka dulmanayaasha ah ee ay dilitaanka u geeystaan dadka ehelka u ah: Nollalinja, taleefankooda 080 005 005, www.nollalinja.fi/somali/
- SERI-xarumaha u gargaaridda dhibbanayaasha waxyeelada jinsiga ah loo geystay: https://thl.fi/fi/web/lapset-nuoret-ja-perheet/tyon_tueksi/vakivallan-ehkaisy/seksuaalivakivalta/seri-seksuaalivakivallan-uhrin-tukikeskukset

Qormooyin iyo warbixino loogu talogalay dadka dhibbanayaasha ah: www.oikeus.fi
Caawimaad sharci: www.oikeus.fi/oikeusapu
Mudduci ama xeer ilaaliye: www.syyttajalaitos.fi
Maxkmadaha: www.oikeus.fi/tuomioistuimet
Magdhowyada falalka denbiyada ah, Khasnadda dawladda ee Valtiokonttori: www.valtiokonttori.fi, taleefankooda: 0295 50 2736
Heshiisiinta: www.thl.fi/sovittelu
Waxa adeegyo jiro ciwaankan ayaa lagu soo koobay: www.suomi.fi